DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

# PUNTLAND STATE OF SOMALIA
# OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL


| SANADKA 24AAD | CADADKA 9AAD | TAARIIKH: 10/09/24 | Lam. 04 |
|---|---|---|---|


## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZETTE

## الجريدة الرسمية

**Wax- ka- bedelka Sharciga Warbaahinta Dowladda Puntland**

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Wax- ka- bedelka Sharciga Warbaahinta Dowladda Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr. 004 ee 10-ka September 2024, kuna saabsan Wax- ka-bedelka Sharciga Warbaahinta Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/43/2024, kuna taariikhaysan 12-ka Agoosto 2024.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Sharciga Warbaahinta Dowladda Puntland.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Wax-ka-bedelka Sharciga Warbaahinta Dowladda Puntland.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

ولاية بونتلاند الصومالية
مكتب الرئيس
Office of the President
Puntland State of Somalia

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/43/2024** **Garoowe, Isniin,** **Taariikh: - 12/08/2024**

**Ku:- Madaxweynaha DPL**

**Garoowe**

**Ujeeddo:-Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Warbaahinta Dawladda Puntland**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(t)** iyo **70-aad (1)** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Qodobadda **2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad(2)** iyo **58-aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: XMWK/DPS/232/2023 ee Sep 03, 2023, kuna saabsan wax-ka-beddelka Xeerka Warbaahinta Dawladda Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-beddelka Iyo Kaabista Xeerka Warbaahinta Dawladda Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 54-aad, Fadhigiisii 17-aad ee 29.07.2024 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-beddelka Xeerka Warbaahinta Dawladda Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**40**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**34**) Mudane, Diidmo majirin, halka ay ka aamuseen (**6**) Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Warbaahinta Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

---

# WAX-KA-BEDDELKA XEERKA WARBAAHINTA DAWLADDA PUNTLAND

## GAROOWE, LUULYO, 2024

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Tusmada Xeerka

Bogga


CUTUBKA 1-aad ........ 1

WARBAAHINTA IYO WERIYAHA ........ 1

Qodobka 1-aad ........ 1

Erey Bixin ........ 1

Qodobka 2-aad ........ 3

Magaca Xeerka ........ 3

Qodobka 3aad ........ 3

Nidaam Guud ........ 3

Qodobka 4-aad ........ 3

Ujeeddooyinka Xeerka. ........ 3

Qodobka 5-aad ........ 4

Noocayada Warbaahinta ........ 4

Qodobka 6-aad ........ 4

Xaqa Saxaafadda ........ 4

Qodobka 7-aad ........ 5

Waajibaadka Warbaahinta ........ 5

Qodobka 8-aad ........ 5

Shuruudaha Suxufiga iyo Tafatiraha ........ 5

Qodobka 9-aad ........ 6

Aqoonsiga Suxufiga ........ 6

Qodobka 10-aad ........ 6

Waxyaabaha ka Reebban Warbaahinta ........ 6

Qodobka 11-aad ........ 7

Diiwaan-gelinta Warbaahinta ........ 7

Qodobka 12-aad ........ 8

Codsiga Diiwaan-gelinta Warbaahinta ........ 8

Qodobka 13-aad ........ 8

Jaangooynta Hirarka ........ 8

Qodobka 14-aad ........ 9

Ruqsadaha iyo Khidmadaha ........ 9

Qodobka 15-aad ........ 9

Lahaanshaha Warbaahinta Gaarka ah ........ 9

Qodobka16-aad ........ 9

Weriye Shisheeye ........ 9

Qodobka 17-aad....................10
Qadaf ama Sumcad dil....................10
Qodobka 18-aad....................10
Waajibaadka Guddiga Sare ee Warbaahinta....................10
Qodobka 19-aad....................10
Guddiga Sare ee Warbaahinta....................11
Qodobka 20-aad....................11
Dhisidda Xubnaha Gudiga Sare ee Warbaahinta....................11
Qodobka 21-aad....................11
Awoodaha Guddiga Sare ee Warbaahinta....................11
Qodobka 22-aad....................11
Muddada Xilka iyo Xil-haynta Guddiga....................12
Qodobka 23-aad....................12
Luminta Xubinnimada Guddiga....................12
Qodobka 24-aad....................12
Habraaca Anshax Marinta ee Guddiga....................12
Sare ee Warbaahinta....................12
CUTUBKA 2-aad....................12
BARAHA BULSHADA....................13
Qodobka 25-aad....................13
Waxyaabaha ka Reebban Baraha Bulshada....................13
Qodobka 26-aad....................13
Xarumaha Dawladda iyo kuwa Gaarka Loo leeyahay....................13
CUTUBKA 3-aad....................13
WACYIGELINTA....................13
Qodobka 27-aad....................13
Mabaadi'da....................13
Qodobka 28-aad....................13
Doorka Wasaaradda ee La xiriira Wacyigelinta....................14
Qodobka 29-aad....................14
Shuruudaha Oggolaanshaha Wacyigelinta....................14
Qodobka 30-aad....................14
Waxyaabaha ka Reebban Wacyi-gelinta....................14
Qodobka 31-aad....................14
Luuqadda Wacyi-gelinta....................14
CUTUBKA 4-aad....................14
XAYEYSIISKA....................14



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 32-aad ........ 14
Mabaadi'da ........ 14
Qodobka 33-aad ........ 14
Mas'uuliyadda Wasaaradda ........ 14
Qodobka 34-aad ........ 15
Luuqadda Xayeysiinta ........ 15
Qodobka 35-aad ........ 15
Waajibaadka Xayeysiiyaha ........ 15
Qodobka 36-aad ........ 15
Xayeysiinta Reebban ........ 15
Qodobka 37-aad ........ 16
Ilaalinta Qiyamka Carruurta ........ 16
Qodobka 38-aad ........ 16
Filimada iyo Riwaayadaha ........ 16
Qodobka 39-aad ........ 16
Ganaax ........ 16
Qodobka 40-aad ........ 17
Xeer-Nidaamiye ........ 17
Qodobka 41-aad ........ 17
Burin ........ 17
Qodobka 42-aad ........ 17
Dhaqan-galka Xeerka ........ 17

# CUTUBKA 1-aad
# WARBAAHINTA IYO WERIYAHA
## Qodobka 1-aad
## Erey Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan;-

| No | Erayga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | Dawlad | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. |
| 2. | Dastuur | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland. |
| 3. | Xeer | Waxaa loola jeedaa Xeerka Warbaahinta Dawladda Puntand. |
| 4. | Wasaarad | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Dawladda Puntland. |
| 5. | Wasiir | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska. |
| 6. | Warbaahin | Waa habka dadka loogu gudbiyo warar, aqoon, madadaalo, khudbado, afkaar, macluumaad oo ah qaab maqal, muuqaal, qoraal ama masrixiyad loona adeegsado qalabka warbaahinta. |
| 7. | Saxafi/Wariye | Waa qof kasta oo ah muwaadin ama ajnebi oo ku shaqeeya mihnadda war-tebinta, aqoonsina ka haysta hay'adaha ku shaqada leh. |
| 8. | Guddiga Sare | Waa guddi nidaamiya, qiimeeya, dhaqanka iyo anshaxa hawl-wadeennada warbaahinta, dhawrana xorriyadda saxaafadda oo ka kooban daneeyayaasha warbaahinta. |
| 9. | Madbacad | Waa aalad makiinad ah oo loo adeegsado in lagu daabaco Wargeysyo, Kutub, Dukumintiyo, Boorar iyo agab kale. |
| 10. | Wargays | Waxaa loola jeedaa Warar, Xog, Dhacdooyin iyo faallooyin daabacan, nidaamsan wakhti ku soo baxa dadkana joogto loogu gudbiyo. |
| 11. | Mawjado | Waa ilo dabiici ah (Hirar) oo ay idaacadaha iyo isgaarsiintu adeegsadaan ayna maamusho Wasaaraddu. |
| 12. | Xarun Raadiye | Waxaa loola jeedaa xarun warbaahin oo soo saarta, faafisana warar laga tabiyo hirarka raadiyaha ee hawada, gaari karana dad badan oo baahsan. |
| 13. | Xarun Telefishin | Waxaa loola jeedaa Xarun warbaahin oo soo saarta, faafisana warar iyo macluumad kuna baahisa Satalayt, Anteeno, dhiish, Internet, cable iyo habab kale oo muuqaalka lagu gudbin karo. |
| 14. | Baraha Bulshada | Waxaa loola jeedaa aaladaha kala duwan ee internet ka ee ay bulshadu u adeegsato, qof ahaan iyo hay'ado ahaanba. |
| 15. | Warbaahin gaar loo leeyahay | Waa warbaahin ay leeyihiin hay'ado ama ganacsato gaar ah, una shaqaysa qaab ganacsi ama samafal. |
| 16. | Warbaahin Dawladeed | Waa Warbaahinta noocyadeeda kala duwan ee ay maamusho Dawladdu. |
| 17. | Hay'ad/ Xarun | Waa xarun si sharci ah u diiwaan-gashan oo soo saarta, faafisana xog/warar ama macluumaad ku baxa qoraal, cod ama muuqaal. |

| | | |
|---|---|---|
| | Warbaahin | |
| **18.** | Machad saxaafadeed | Waa Xarumaha lagu barto waxbarashada la xiriirta saxaafadda. |
| **19.** | Wacyigelin | Waxaa loola jeedaa hab dadka lagu baraarujiyo waxna lagu baro. |
| **20.** | Ablaawe | Waxaa loola jeedaa Ilmaha aan aabihii la aqoon ama aan ku dhalan meher sharci ah. |
| **21.** | Ruqso | Waa oggolaansho sharci oo ay bixiso Wasaaraddu. |
| **22.** | Shati | Waa Shahaado shaqo oo ay Wasaaraddu bixiso |
| **23.** | UWP | Waxaa loola jeedaa Ururka Warbaahinta Puntland ee (MAP). |
| **24.** | Urur Warbaahin | Waa urur Caalami ah ama waddani ah oo aan dowli ahayn ama urur bulsho rayid ah oo difaaca ama u qareema una dhaq-dhaqaaqa danaha warbaahinta iyo wariyayaasha. |
| **25.** | Anshaxa Saxaafadda | Waa nidaam ay hay'ad warbaahineed dhigato si ay ugu anshax mariso gefafka ka dhaca shaqaalaha warbaahinta una ilaaliso xuquuqdooda, islamarkaana u difaacdo mihnadda warbaahinta. |
| **26.** | Anshax | Waa hannaan lagu kala sooco wanaagga iyo xumaanta, marka laga eego dhanka Diinta Islaamka, qawaaniinta dalka iyo dhaqanka. |
| **27.** | Xayeysiis | Waa war kasta oo ogaysiis iidheh ah loo sameeyo, loona adeegsado aaladaha kala duwan sida kuwa loo isticmaalo maqalka, muuqaalka, qoraallada iyo jilliinka. |

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Warbaahinta Puntland.

## Qodobka 3aad
## Nidaam Guud

1. Xeerka warbaahintu wuxuu qeexayaa nidaamka guud iyo kan farsamo ee saxaafadda, wuxuuna macnaynayaa xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha warbaahinta, xeerkani waxaa kale oo uu qeexayaa hawlgalka Guddiga sare ee Warbaahinta.
2. Tub-raaca warbaahinta Puntland, mid dawladeed iyo mid gaar loo leeyahay, waxaa guud ahaan maaraysa Wasaaradda.
3. Xeerkan ayaa qaabaynaya hannaanka maaraynta warbaahinta Puntland.
4. Xeerkan oo ka hadlaya waajibaadka, xuuquuqaha warbaahinta, warfidiyeenka iyo Guddiga Sare ee warbaahinta waxaa si isku mid ah loogu dhaqayaa warbaahinta dawladdu leedahay iyo warbaahinta gaarka loo leeyahay ama labadaba.

## Qodobka 4-aad
## Ujeeddooyinka Xeerka.

Ujeeddooyinka Xeerkani waa:-

1. Dejinta mabaadi'da iyo xeerarka lagu hagayo warbaahinta.
2. Horumarinta, dhawrista iyo ixtiraamka xorriyadda warbaahinta.
3. Dhiiri-gelinta warbaahinta gaarka ah iyo tan dawladda.
4. Hagidda iyo qorshaynta hawlaha wacyigelinta.
5. Midaynta iyo kor u qaadidda hawlaha wacyigelinta Dawladda Puntland.
6. Ku wacyigelinta bulshada ku dhaqanka Diinta Islaamka, ilaalinta waddaniyadda iyo danaha guud.
7. Hagista xayeysiinta badeecadaha iyo adeegyada ganacsi ee Puntland.
8. Horumarinta adeegyada xayeysiinta iyo iidhehda.
9. Maamulidda iyo nidaaminta arrimaha iidhehda iyo xayeysiiska.
10. Xakameynta xad-gudubyada ka dhasha adeegyada xayeysiinta.
11. Qeexidda anshaxa wax-tebinta ee xirfadlayaasha iyo shirkadaha.
12. Kobcinta kalsoonida dadweynuhu ku qabaan xayeysiisyada iyo iidhehda.
13. Xaqiijinta inaan aaladaha baraha bulshada loo adeegsan waxyeellaynta sumcadda qof gaar ah ama qof qaanuuni ah.
14. Dhiirigelinta habsami u adeegsiga tiknoolajiyadda.
15. Xakamaynta nacaybka, sumcad dilka iyo been abuurka ee loo adeegsado baraha bulshada.
16. Xakamaynta luuqad abuuri karta nacayb iyo sumcad dil.



XAAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 5-aad
## Noocayada Warbaahinta

Noocyada warbaahintu u qaybsanto waa: -

1. Warbaahinta daabacan sida: majaladaha, wargaysyada IWM.
2. Warbaahinta hirarka sida: raadiyaha, telefishinka, IWM.
3. Warbaahinta Digitalka sida: Mareegaha, Baraha Bulshada, IWM.

## Qodobka 6-aad
## Xaqa Saxaafadda

1. Xorriyadda saxaafaddda iyo Warbaahintu waa lama taabtaan, waxaana dammaanad qaaday Dastuurka Dawladda Qodobkiisa 22-aad, waxayna xushmad iyo qiimayn ka mudan tahay Puntland.
2. Xorriyadda Warbaahinta waxaa ka mid ah madax-bannaanida iyo xorriyadda helitaanka xogta, xaqqa cabbiraadda ra'yiga iyo dhaliisha.
3. Faafreebka hordhac ahi waa reebban yahay.
4. Ciqaab iyo xayiraad midna kuma samayn karaan wariyayaasha iyo warbaahinta cid aan ka ahayn Hay'adaha sharci ahaan u xilsaaran.
5. Suxufiyiinta iyo Xarumaha warbaahinta Puntland waxay ku midoobi karaan ururro xirfadeed heer Puntland ah, kuwaasoo difaaca, kana shaqeeya danahooda, lehna habraacyo lagu doorto hoggaankooda.
6. Suxufiyiintu waxay ka mid noqon karaan ururro saxaafadeed mid heer qaran, heer Maamul iyo heer caalami.
7. Warbaahintu waxay xaq u leedahay inay hesho xog kasta si ay ugu gudbiso bulshada.
8. Warbaahintu waxay xaq u leedahay in ay soo saarto, raadiso, faafiso xog ama warar ay u gudbinayso dadweynaha, iyadoo adeegsanaysa mawjado loo xaddiday.
9. Warbaahintu waxay xaq u leedahay in ay soo saarto warar ama xog ay iyadu leedahay ama xog, warar iyo barnaamijyo ay ka qaataan ilo-wareed kale, waxayna xushmaynayaan xuquuqda lahaanshaha iyo heshiiska ay la galeen cidda leh asalka xogtaas ama barnaamijkaas.
10. Suxufigu wuxuu u madax-bannaan yahay shaqadiisa ku saabsan raadinta iyo faafinta wararka iyo xaqiiqada la xiriirta hawlihiisa sida uu qabo Dastuurka Puntland.
11. Cidina suxufi kuma khasbi karto inuu sheego ilaha uu wararka ka helo.
12. Suxufi/Weriyuhu xaq ayuu u leeyahay in la dhawro nabadgelyadiisa qofeed, sharaftiisa iyo hantidiisa si xor ahna u faafin karo macluumaadka uu helay isagoo ku dhaqmaya nidaamka xeerkani farayo.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 7-aad
## Waajibaadka Warbaahinta

Waajibaadka Warbaahinta waxaa kamid ah:-

1. Warbaahintu waa inay xushmaysaa dhawrsanaanta ama sirnimada xirfadeed.
2. Warbaahintu ma shaacinayaan aqoonsiga dadka xogta bixiya haddii aan fasax cad laga helin.
3. Sababta qarsoonaanta waa in la qiimeeyaa inta aan wararka ama xogta la baahin.
4. Haddii xarunta warbaahintu u aragto qarsoonaanta isha warka mid maangal ah ayna ku jirto danta ummadda, warkaas ama xogtaas waa la baahin karaa.
5. Suxufigu waa inuu magaciisa dhabta ah ku saxiixaa qoraallada uu qoro.
6. Mulkiilayaasha Xarumaha warbaahintu waxay ilaalinayaan xuquuqda shaqaalahooda.
7. Maamulayaasha xarun kasta oo warbaahineed waxaa waajib ku ah in ay heshiis qoran la galaan shaqaalahooda, waana inaanu ka hor imanayn xeerarka shaqada iyo shaqaalaha ee Puntland.
8. Dhammaan heshiisyada shaqaalaha ee xarumaha warbaahinta waa inay ka dhacaan nootaayo la aqoonsan yahay.
9. Warbaahintu waa inaanay ku xadgubin Diinta Islaamka, dhaqanka suubban, Shuruucda Puntland iyo xuquuqda qofka.
10. Mas'uuliyiinta warbaahineed oo kala ah: Mulkiilaha, Maamulaha, Tafatiraha iyo weriyaha waxay mas'uuliyad ka saaran tahay hubinta in warka iyo barnaamijyada ay baahinayaan yihiin kuwo xaqiiqo ku salaysan.
11. Warbaahintii dib u soo saarta ama dib-u-baahin ku samaysa warar, barnaamijyo ama macluumaad cid kale soo saartay, iyaga ayaa lagala xisaabtamayaa.
12. Idaacadadaha iyo Telefishannadu waxay si xushmad leh u raacayaan nidaamka hirarka hawada ee Wasaaraddu dejisay.

## Qodobka 8-aad
## Shuruudaha Suxufiga iyo Tafatiraha

1. Qofka noqonaya Suxufi waa:-
   - b. Inuu yahay Muwaadin Soomaaliyeed.
   - t. Inuu leeyahay aqoon heer Jaamacadeed ama aqoon Machad Saxaafadeed.
   - j. Inuu leeyahay hal sano oo waayo-aragnimo la xiriirta shaqada saxaafadda.
   - x. Inaan Da'ada suxufigu waa inaanay ka yarayn 22 sano.
   - kh. Inaan xukun Maxkamadeed ku dhicin sannadkii ugu dambeeyey.
2. Tafatiraha ka shaqeeya xarun warbaahineed kama shaqayn karo xarun kale haddaanu oggolaansho ka haysan Xarunta uu ka shaqeeyo.
   - b. Da'ada tafatiruhu waa inaanay ka yarayn 25 sanno.
   - t. Tafatiruhu waa inuu aqoon dheeraada u leeyahay luuqadda uu wax ku soo saarayo.

j. Tafatirayaasha warbaahinta ayaa mas'uul ka ah falalka suxufiyiinta ka hoos shaqeeya iyo macluumaadka ay faafiyaan warbaahintoodu.

## Qodobka 9-aad
## Aqoonsiga Suxufiga

1. Guddiga sare ee Warbaahinta Puntland ayaa suxufiga buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 8-aad ee xeerkan siinaya aqoonsiga suxufinimo, ka dib marka ay qaadaan tallaabooyinka lagu hubinayo xirfaddiisa suxufinimo.
2. Suxufi kasta oo la siiyo aqoonsiga suxufinimo waxaa lagu qorayaa xogtiisa diiwaanka warfidiyeenka Puntland.
3. Suxufiga Muwaadinka ah marka uu qaadanayo aqoonsiga waxaa laga qaadayaa khidmad dhan soddon doolar ($30) sannadkii, dakhligaasna waxaa la marinayaa nidaamka maaliyadeed ee Dawladda Puntland.
4. Suxufiga shisheeye aqoonsiga uu kaga hawlgalayo Puntland wuxuu marayaa sida ku cad farqada 1-aad ee Qodobkan.
5. Suxufiga shisheeye (Ajnabi) ee ka hawl-galaya Puntland wax ka badan soddon (30) beri ee buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 16-aad ee xeerkan, waxaa waajib ku ah in uu Guddiga Sare ee Warbaahinta Puntland ka qaato aqoonsiga uu ku hawlgalayo, khidmaduna waa boqol doolar ($100), waxaana la marinayaa nidaamka maaliyadeed ee Dawladda Puntland.
6. Suxufiga shisheeye (Ajnabi) ee ka hawl galaya Puntland soddon ( 30) maalmood iyo wixii ka yar ee buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 16-aad ee xeerkan waxaa waajib ku ah in uu Guddiga Sare ee Warbaahinta Puntland ka qaato aqoonsiga uu ku hawlgalayo, khidmaduna waa konton doolar ($50), waxaa la marinayaa nidaamka maaliyadeed ee Dawladda Puntland.
7. Suxufiga shisheeye (Ajnabi) ee ka warramaya arrimaha bini-aadantinnimada ee jira Puntland oo buuxiya shuruudaha ku xusan Qodobka 16-aad ee xeerkan waxaa waajib ku ah in uu Guddiga Sare ee Warbaahinta Puntland ka qaato aqoonsiga uu ku hawlgalayo muddo soddon (30) maalmood ah, wax khidmad ahna laga qaadi maayo.

## Qodobka 10-aad
## Waxyaabaha ka Reebban Warbaahinta

1. Lama Baahin karo:-
   b. Wax kasta oo ka hor imanaya Diinta lslaamka iyo dhaqanka suubban.
   t. Warar iyo dacaayado dhaawacaya nabadgelyada, xasilloonida dawladda, dhaqaalaha iyo danaha guud ee ummadda Puntland.
   j. Sirta Dawladda Puntland ee dhaawici karta xasilloonida iyo nidaamka Dawladnimada.
   x. Warar, sawirro, filimo ama qoraallo ka hor imanaya anshaxa saxaafadda.
   kh.Qaddiyad maxkamadeed oo aan weli go'aan laga gaarin.
   d. Sawirro, muuqaallo ama filimo dad qaawan.

r. Xog ku saabsan dhibbane la fara-xumeeyey ama uuraysi aan dariiq Islaamka ku iman, haddii aanu dhibanahaasi oggolaan isaga/iyada oo ogsoon cawaaqibka ka dhalan kara marka la shaaciyo.
s. Shaacinta la xiriirta qof ablaawe ah, haddii aanay jirin caddaymo saamixi kara oo sharci ahaan oggolaanaya.
sh. Qof lagu takoorayo Diintiisa, midabkiisa, jinsiyaddiisa, luuqaddiisa iyo lixaadkiisa.

2. Waxaa kaloo reebban Duubis ama dhegeysi sir ah sida:-
   b. Duubis ama dhegeysi sir ah oo la adeegsaday qalabka wax lagu duubo ama wax lagu basaaso.
   t. Warar ama xog si qarsoodi ah taleefan loogu duubay ama lagu qaaday qalabka dhegeysiga qarsoodiga ah, marka laga reebo in danta ummaddu ku jirto, isla markaana aysan suurto gal ahayn in macluumaadkaas si kale lagu helo.
   j. In aysan waraysan ama sawiran carruur da'doodu ka yar tahay 15 sano kalana hadlin caruurtaas ammuuro khuseeya daryeelkooda ama daryeelka carruur kale, haddii aanay waalidkood oggolaan, ama aanu goob-joog ka ahayn qof weyn oo mas'uul ka ah carruurtaas, markii laga reebo inay jiraan duruufo ku kallifaya inay waraystaan carruurtaas.
3. In lagu xadgudbo xuquuqda Daabacaadda sida:-
   b. Min-guurinta ama isticmaalka hal-abuurka iyo hantida maskaxeed ee cid kale iyagoo aan fasax looga haysan.
   t. Sawirrada la dhalan rogo iyo agab kaleba oo looga jeedo khiyaamo iyo marin habaabin waa reebban yihiin.
   j. In la xuso cidda iska leh wax-soo-saarka saxaafadeed marka la isticmaalayo agabkooda, marka aan fasax la heli karin sababo maangal ah dartood iyo marka asalka agabka uu yahay mid si caam ah loo wada adeegsado, tixraaca cidda leh xuquuqda daabacaadda waa in ay u caddahay dadweynaha, mas'uuliyadda arrinkanina waxay saaran tahay warbaahinta.
   x. Soo-saaridda Wargays ama qoraal soo bixitaankiisa la mamnuucay ama aan oggolaansho ka haysan Wasaaradda.
   kh. Daabicidda qoraallo aan oggolaansho looga haysan qoraaga.
4. Waxaa ka reebban weriyaha inuu u adeegsado mihnaddiisa dano iyo dheef isaga u gaar ah, dadkana cadaadis ku saaro, si uu u helo dano dhaqaale.

## Qodobka 11-aad
## Diiwaan-gelinta Warbaahinta

1. Aasaaska xarun/hay'ad warbaahineed oo buuxisa Shuruudaha Xeerkan, waxaa laga diiwaan-gelinayaa Wasaaradda.
2. Xarun warbaahineed horey u diiwaangashanayd oo soo kordhisata qayb

warbaahineed cusub, waxaa soo kordhinta cusub loo diiwaan-gelinayaa si waafaqsan hab-raaca diiwaan-gelinta.

3. Xafiis dawladeed, ururrada Caalamiga ah, hay'ad ama shirkad gaar loo leeyahay oo qabanaysa hawlo saxaafadeed, waxay isu diiwaan-gelinayaan si waafaqsan Xeerka warbaahinta.
4. Qofka leh shirkad (mulkiilaha) daabacaadda saxaafadeed ayaa mas'uul ka ah lagalana xisaabtamayaa maamulka maaliyadeed iyo macluumaadka lagu qoro daabacaadaheeda.

## Qodobka 12-aad
## Codsiga Diiwaan-gelinta Warbaahinta

1. Codsiga diiwaan-gelinta waa in ay la socdaan:-
   b. Magaca hay'adda warbaahineed yeelanayso iyo laanta warbaahinta haddii ay kala duwan yihiin.
   t. Nooca shaqada warbaahineed ee la diiwaan-gelinayo iyo wakhtiga uu soo baxayo haddii ay warbaahintu tahay tan la daabaco.
   j. Cinwaanka xarunta Warbahineed iyo meesha ay ku taal sida: - degmo, xaafad, dariiq IWM.
   x. Hay'ad ama xarun warbaahineed ma hawl geli karto diiwaan-gelin la'aan.
   kh. Diiwaangelin la'aanta xarun warbaahin waxay mudan kartaa xayiraad ilaa inta laga diiwaan-gelinayo.
2. Codsiga Diiwaan-gelinta Mulkiilayaasha iyo shaqaalaha xarun warbaahin waa sidan:-
   b. Magaca mulkiilaha ama magacyada mulkiilayaasha warbaahinta.
   t. Magacyada tafatirayaasha warbaahinta oo ay aqoontooda mihnadeed sugan tahay.
   j. Mulkiilaha xarun kasta oo warbaahineed marka uu cinwaanka xarunta beddelo wuxuu la socodsiinayaa Wasaaradda iyo Guddiga Sare ee Warbaahinta.

## Qodobka 13-aad
## Jaangooynta Hirarka

1. Mawjadaha idaacadaha iyo Telefishinnadu waa ilo dabiici ah oo xaddidan, maamulka baaxadda xuduudaha mawjadaha waxaa mas'uul ka ah Wasaaradda.
2. Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay maamulka, xadaynta iyo bixinta hirarka Puntland, si xaq ah oo muuqata ayeyna u bixinaysaa.
3. Hirarka warbaahintu waa hanti Dawladeed, mana geli karto cid aan Wasaaradda ka haysan oggolaansho.
4. Habraac gaar ah ayey Wasaaraddu ka soo saaraysaa hannaanka xadaynta, qeybinta iyo ilaalinta hirarka hawada.
5. Khidmadaha hirarka hawada waxaa laga tixraacayaa Xeerka Cashuuraha Berriga.

## Qodobka 14-aad
## Ruqsadaha iyo Khidmadaha

Khidmadaha ruqsaduhu waxay noqonayaan:-

1. Hay'adaha warbaahintu waxay bixinayaan khidmad sannadle ah ama cusboonaysiin ah sida ku cad Xeerka Cashuuraha Berriga.
2. Jaangoynta khidmadaha warbaahineed oo ruqsadda la siinayo waxaa lagu caddeeyey Xeerka Cashuuraha Berriga.
3. Muddada ku dhaqanka ruqsadda la siiyo hay'adaha warbaahinta ee ay bixiso Wasaaradda Warfaafintu waa 12 bilood oo ka bilaabmaysa maalinta la soo saaro ruqsadda.
4. Hay'adda warbaahineed ee cusboonaysiin weyda ruqsaddeeda sannadle waxay mutaysanaysaa ganaax iyadoo loo eegayo heerkeeda shaqo.

## Qodobka 15-aad
## Lahaanshaha Warbaahinta Gaarka ah

1. Qof ama ka badan oo ku midoobay oo oggolaansho ka haysta Wasaaradda ayaa yeelan kara warbaahin gaar ah.
2. Warbaahinta gaarka ahi waxay la socodsiinaysaa Wasaaradda isbeddel kasta oo ku yimaada lahaanshaha warbaahineed sida iibin ama wareejin.
3. Warbaahinta dibadda iyo shakhsiyaadka kale ee danaynaya warbaahinta Puntland waxay wadaag la noqon karaan warbaahin laga leeyahay Puntland ama waxay furan karaan warbaahin cusub oo u gaar ah.
4. Codsiyada lagu dalbanayo warbaahin gaar loo leeyahay waa in lagu Caddeeyaa asalka ra'sumaalka lagu maalgeliyey.

## Qodobka16-aad
## Weriye Shisheeye

1. Weriye shisheeye oo ka socda wakaalad, wargays, idaacad, telefishan ama saxaafad shisheeye wuxuu ka hawl geli karaa oo keli ah Puntland marka uu oggolaansho ka haysto Wasaaradda.
2. Wasaarad ama hey'ad dawladeed oo doonaysa in ay keensato weriye shisheeye, waxay oggolaansho weydiisanaysaa Wasaaradda.
3. Warbaahin qalaad ama Wakiilladoodu waa ay ka hawl-geli karaán Puntland, xuquuqda iyo waajibaadkana waxay kala siman yihiin saxaafadda waddaniga ah.
4. Suxufi shisheeye looma oggola in uu galo ama sawiro xeryaha iyo fadhiisinada ciidamada iyo goobaha kale ee ku-meel-gaar ahaan aan la oggolayn in la galo haddii aanu fasax ka haysan maamulkeeda.
5. Hay'adda warbaahineed ee ay ku caddaato in ay si sharci darro ah ku keensatay suxufi shisheeye, xeel-dheere ama farsamo-yaqaan qalaad, waxaa la horgaynayaa Maxkamadda awooda u leh si ay ugu xukunto Qodobada uu ku xad gudbey ee la xiriira xeerkan iyo xeerarka kale ee Puntland.
6. Weriye shisheeye oo fasax la'aan kaga hawlgala dhulka Puntland, waxaa la



STATE GENERAL SOLICITOR

horgaynayaa Maxkamadda awooda u leh si ay ugu xukunto Qodobada uu ku xad gudbey ee la xiriirta xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.

## Qodobka 17-aad
## Qadaf ama Sumcad dil

1. Waxyaabaha dhaliya sumcad-dilka waxaa ka mid ah:-
   i. Hadal ama qoraal been abuur ah iyo sharaf-dil khuseeya cid kale.
   ii. Daabicid ama baahin hadal ama bayaan xaq darro ku ah cid kale oo qalabka warbaahinta lagu faafiyo.
   iii. Ihaanada waxay noqon kartaa mid qoraal ahaan loogu daabacay warbaahinta ama hadal ahaan loogu baahiyey qalabka warbaahinta.
2. Warbaahinta looma oggola wax kasta oo dhaawacaya ama ihaano ku ah sharafta shakhsi kasta iyo hay'ad kasta, haddii aanay u adeegayn danta dadweynaha.
3. Haddii qof ama hay'ad sharaftooda la dhaawaco, waxay marka hore cabasho u gudbinayaan Guddiga Sare ee Warbaahinta, haddii go'aanka Guddiga Sare ee Warbaahinta ay ku qanciwaayaan midkood ama labada dhinacba, wuxuu dhinacaasi dacwadiisa u gudbin karaa Maxkamadda awoodda u leh.
4. Runta ayaa ah difaaca buuxa marka ay dacwaddu la xiriirto sumcad-dil (sharaf-dil).
5. Ka waramidda danaha ummadda oo si caddaalad ah oo dheelitiran loo tebiyo difaaca iyo tixgelin marka ay timaado xaalad ku saabsan sumcad dil.
6. Haddii dacwooduhu uu yahay qof warbaahinta ka dhex-muuqda, waa inuu caddeeyaa dhab ahaan dhaawaca ka soo gaaray qadafka uu dareemayo in loo geystay.
7. Eedaymaha loo soo jeediyo warbaahinta ama weriyaha ee ay ka dhalan karaan dacwad ciqaabeed, waxaa dacwaddaas laga oogi karaa Maxkamadda ay khusayso dacwaddaas.
8. Marka ay hay'ad Warbaahineed tebiso ama muujiso qoraal ama muuqaal qadaf ah ama been ah xaq ayuu u leeyahay qofka la ceebeeyey ama laga been abuurtay inuu isla hay'addaas jawaab-celin is difaac ah ka bixiyo.
9. Saxaafadda warkaas oo kale baahisa ama qorta waxaa waajib ku ah in ay fursad u siiso qofka ay khusayso in uu sida ugu dhakhsaha badan jawaab celin uga bixiyo meeshii markii hore laga baahiyey ama lagu qoray.

## Qodobka 18-aad
## Waajibaadka Guddiga Sare ee Warbaahinta

1. Guddiga sare ee warbaahinta Puntland waa mid madax bannaan oo maaraynaya hawlaha saxaafadda Puntland.
2. Guddigu wuxuu ilaaliyaa xuquuqda iyo xorriyadda warbaahinta si waafaqsan xeerkan.
3. Guddigu isagoo ka duulaya mabaadi'da asaasiga ah ee difaaca iyo horumarinta

xorriyadda fikirka wuxuu xalliyaa khilaafaadka iyo murannada ka dhasha hawlaha Saxaafadda.

4. Guddigu wuxuu dejinayaa Xeer-hoosaad iyo hannaan uu ku fuliyo waajibaadkiisa.
5. Guddiga sare ee warbaahintu wuxuu nidaaminayaa, qiimaynayaa dhaqanka, anshaxa, hawl-wadeennada Warbaahinta isagoo ilaalinaya xeerka Warbaahinta.
6. Diiwaan-gelinta cabashooyinka iyo tabashooyinka ka yimaada dadweynaha, warbaahinta iyo dawladda, waxaana uu qaataa go'aamo ku habboon oo uu ku maareeyo cabashooyinka.
7. Wuxuu dhex-dhexaadiyaa oo uu ka garnaqaa murannada ama khilaafaadka u dhexeeya dadweynaha, Warbaahinta iyo Dawladda.
8. Wuxuu qaataa tallaabooyin anshax-marin ah oo ka dhan ah warbaahinta gaarka ah, tan dawladda iyo suxufiyiinta iyo Tafatirayaasha madaxa-bannaan.
9. Wuxuu hubiyaa, filimada iyo aaladaha kale ee Diin ahaan iyo dhaqan ahaan aan ku habboonayn ka hor intaan dadweynaha loo gudbin.
10. Guddiga Sare ee Warbaahinta waxay qaab-dhismeedkooda iyo xeer-hoosaadkooda u soo gudbinayaan Wasaaradda.

## Qodobka 19-aad
## Guddiga Sare ee Warbaahinta

Guddiga Sare ee Warbaahinta wuxuu ka kooban yahay:-

b. Sarkaal ka tirsan Wasaaradda Warfaafinta.
t. Wakiil ka tirsan Ururka Warbaahinta Suxufiyiinta Puntland.
j. Khabiir ka socda Tacliinta Sare Puntland.
x. Labo xubnood oo ka socda Bulshada Rayidka ah.
kh.Wakiil ka socda Hay'adaha Warbaahinta Dawladda.
d. Garyaqaan ka mid ah Ururka Qareennada Puntland.

## Qodobka 20-aad
## Dhisidda Xubnaha Gudiga Sare ee Warbaahinta

1. Xubnaha Guddiga Sare ee Warbaahinta waxaa soo dooranaya ama magacaabaya hay'adaha ay wakiilka ka yihiin.
2. Magaca xubin kasta oo la doortay ama la magacaabay waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda, Wasiirka Wasaaradda ayaana wareegto ku soo saaraya.
3. Guddigu wuxuu kulankiisa ugu horreeya ku dooranayaa Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeen, Xoghayn iyo khasnaji.

## Qodobka 21-aad
## Awoodaha Guddiga Sare ee Warbaahinta

1. Guddiga Sare Warbaahintu wuxuu yeelanayaa awood maamul iyo mid dhaqaale oo uu hawlihiisa ku fuliyo.
2. Guddiga Sare ee Warbaahintu si uu waajibaadkiisa u guto, waxaa dhaqaale ahaan

lagu taageerayaa khidmadaha ay qaaddo Wasaaraddu.

3. Guddigu wuxuu qaadayaa tallaabooyin lagu anshax-marinayo warbaahinta iyo suxufiyiinta isagoo dabaqaya xaqqa jawaabcelinta, dib-u-sixidda iyo in raaligelin dadweynuhu maqlaan la siiyo cidii lagu gafey, loona mariyo raaligelintaas isla warbaahintii loogu gafey.
4. Anshax-marinta shakhsiyaadka mas'uulka ka ah warbaahinta sida tafatiraha guud, lagu soo rogayo shaqa joojin ku-meel gaar ah oo muddo cayiman, iyadoo loo eegayo hadba gefka qofka ka dhacay.
5. Guddigu wuxuu ku xukumayaa magdhow khasaare bixin Hay'adda qofka gefka geystay ka tirsan yahay ama qalabkeeda lagu faafiyey gefkaas. Magdhowgaas ama ganaaxaasi waxaa loo eegaya hadba awoodda dhaqaale ee hay'addaas inta uu le'eg yahay.

## Qodobka 22-aad
## Muddada Xilka iyo Xil-haynta Guddiga

Muddada xilhaynta Guddiga Sare ee Warbaahinta Puntland waa 3 sano oo ka bilaabmaysa maalinta la magacaabo.

## Qodobka 23-aad
## Luminta Xubinnimada Guddiga

1. Xubintu waxay xilka ku waayi kartaa sidan:-
   b. Geeri.
   t. Xil-gudasho la'aan.
   j. Xubinta oo is casisha.
   x. Xilka oo ka dhammaada.
   Kh.Xukun Maxkamadeed oo ku dhaca xubinta.
3. Xubinta ku wayda xilkeeda sida ku xusan qodobkan farqada 2-aad xarfaha (b,t, j, x, iyo kh) buuxinta xilkaas waxaa loo marayaa habraacii ay ku timi xubintii hore.

## Qodobka 24-aad
## Habraaca Anshax Marinta ee Guddiga Sare ee Warbaahinta

Guddiga Sare wuxuu awood u leeyahay:-

1. Haddii ay ku qanci waayaan dhinacyada dacwadda isku haya go'aanka guddiga, waxay cabashadooda u gudbinayaan Maxkamadda awoodda u leh.
2. Guddiga Sare ee Warbaahinta wuxuu marayaa tallaabooyinka soo socda marka la anshax marinayo shaqaalaha warbaahinta:
   b. Digniin afeed.
   t. Digniin qoraaleed.

j. Ganaax aan ka badneyn toddobaad mushaharkiisa.
x. Ganaax aan ka badneyn labo todobaad mushaharkood.

3. Guddiga ayaa go'aaminkara tallaabooyin anshax marineed oo ka baxsan kuwa lagu xusay faqrada 2-aad ee Qodobkan.

## CUTUBKA 2-aad
## BARAHA BULSHADA
## Qodobka 25-aad
## Waxyaabaha ka Reebban Baraha Bulshada

Waxaa baraha bulshada ka reebban:-

1. Wax kasta oo ka hor imanaya Diinta Islaamka, shuruucda Puntland, waxyelleenaya dawladnimada iyo dhaqanka suubban.
2. Gef loo geysto qof ama qeybo bulshada ka mid ah, taasoo horseedi karta colaad, amni darro, iska hor imaad iyo shaqaaqo.
3. Dacaayado wax u dhimaya nabadgalyada iyo xasilloonida.
4. Sawirro, filimo ama qoraallo ka hor imanaya anshaxa iyo shuruucda Puntland.
5. Muuqaallada ka xog warranka iyo wareysiga carruurta, haddaan qoraal oggolaansho ah, laga haysan waalidka iyo cidda ka wakiilka ah.
6. Isticmaalka qoraal, suugaan, sawirro, hal-abuur cid aan oggolaansho laga haysan.
7. Duubid qarsoodi ah cod, muuqaal, sawirro waxyeello u leh cid ama bulshada, laguna baahiyo baraha bulshada.
8. In lagu baahiyo aaladaha baraha bulshada, muuqaallo, xogo iyo warar aan xaqiiq aheyn loogana gol-leeyahay in qof, qolo, qeyb ka mid bulshada lagu been abuurto.

## Qodobka 26-aad
## Xarumaha Dawladda iyo kuwa Gaarka Loo leeyahay

Waa in loo haystaa oggolaansho baahinta muuqaallada xarumaha hoos ku xusan:-

1. Xarumaha Ciidamada.
2. Xarumaha gaarka loo leeyahay.

## CUTUBKA 3-aad
## WACYIGELINTA
## Qodobka 27-aad
## Mabaadi'da

Wacyigelintu waa in ay ku dhisan tahay Diinta Islaamka, Shuruucda Puntland iyo Dhaqanka suubban.

## Qodobka 28-aad
## Doorka Wasaaradda ee La xiriira Wacyigelinta

1. Kor-joogteynta qorshayaasha wacyigelinta warbaahinta Dawladda Puntland.
2. Xiriirinta barnaamijyada iyo qorshayaasha wacyigelineed ee laga fuliyo Puntland.

## Qodobka 29-aad
## Shuruudaha Oggolaanshaha Wacyigelinta

1. Wacyigelin kasta oo ay samaynayso Hay'ad warbaahineed ee diiwaan-gashan waa inay oggolaansho ka haysato Wasaaradda.
2. Hay'adaha aan dowliga ahayn ee ka shaqaynaya wacyigelinta, waa inay soo buuxiyaan shuruudaha ku qeexan Xeerkan.

## Qodobka 30-aad
## Waxyaabaha ka Reebban Wacyi-gelinta

Waxaa reebban:-

1. Wax kasta oo ka horimanaya Diinta Islaamka, xeerarka Puntland, dhaqanka suubban oo waxyeellaynaya midnimada iyo wada jirka bulshada.
2. Wacyigelinta loo adeegsado cod-baahiyaha waa in aanay aad ugu dhawaan goobaha caafimaadka iyo waxbarashada.
3. Adeegsiga sawirrada iyo muuqaallada anshax darrada ah.

## Qodobka 31-aad
## Luuqadda Wacyi-gelinta

Wacyigelinta waa in loo adeegsadaa luuqadda Soomaaliga, sida uu qeexayo Xeerka Ilaalinta Afka Soomaaliga.

# CUTUBKA 4-aad
# XAYEYSIISKA

## Qodobka 32-aad
## Mabaadi'da

1. Daah-furnaanta tartanka xayeysiinta iyo suuq-gaynta.
2. Dammaanad-qaadka xuquuqda daabacaadda iyo lahaanshaha.
3. Sugidda ilaha xayeysiiska ama iidhehda.

## Qodobka 33-aad
## Mas'uuliyadda Wasaaradda

1. Diyaarinta xeer-nidaamiyaha iyo hab-raacyada ku wajahan hagidda iyo maamulka shirkadaha iyo xirfadlayaasha ka hawlgala xayeysiinta.
2. Maareynta bixinta ruqsadaha iyo laalidda shirkadaha iyo xirfadlayaasha ka hawgala xayeysiinta.

3. Kor-joogteynta dhaqangalka xeerka, xeer-nidaamiyaha iyo hab-raacyada la xiriira arrimaha xayeysiinta.
4. Maareynta khilaafaadka iyo cabashooyinka la xiriira arrimaha xayeysiinta.
5. Inay hubiso in badeecadaha iyo adeegyada la xayeysiinayo waafaqsan yihiin xeerkan.

## Qodobka 34-aad
## Luuqadda Xayeysiinta

Waa in Af-Soomaali ay ku baxaan xayeysiinta iyo iidhehdu.

## Qodobka 35-aad
## Waajibaadka Xayeysiiyaha

1. Waxaa waajib ah marka la baahinayo badeeco in la raaco tallaabooyinkan:-
   b. Ruqsad kasta oo xayeysiineed waxaa isticmaali kara oo keliya, cidda ay magaceeda ku soo baxday.
   t. Xigashooyinka qiimaha badeecadda ee ay soo bandhigaan shirkadaha iyo xirfadlayaasha, lama beddeli karo, ilaa inta ay socoto waqtiga u qorsheysan xayeysiintaas.
2. Adeegyada ama badeecadaha la xayeysiiyey lama garab dhigi karo adeeg iyo badeeco kale oo la nooc ah.
3. Lama xayeysiin karo badeecad ama adeeg haddaan ruqsad laga haysan mulkiilaha.
4. Muddada dammaanad-qaadka adeegga ama badeecadda waa in lagu caddeeyaa iidhehda.

## Qodobka 36-aad
## Xayeysiinta Reebban

Waxaa reebban:-

1. Xayeysiisyada saamaynta xun ku reebi kara bulshada.
2. Xayeysiinta aan waafaqsanayn mabaadi'da anshaxa xayaysiiska.
3. Xayeysiin aan dhab ahayn oo ujeedkeeduna yahay kaliya soo jiidashada macaamiisha.
4. Xayeysiisyada si xun loo isticmaalo natiijooyinka cilmibaarisyada ama lagu takrifalo xigashooyinka farsamo iyo qoraallada cilmiyeysan.
5. In la xayeysiiyo khamriga, maandooriyeyaasha, khamaarka iyo wax kastoo fal-dembi ku sifoobi kara.
6. Waa in laga digtoonaadaa waxyaabaha waxyeellada ku ah xuquuqda carruurta.
7. In la xayeysiiyo dhammaan dawooyinka nooc kasta.
8. Xayeysiinta caanaha carruurta si loo dhiirrigeliyo naas-nuujinta.
9. Xayeysiinta waxyaabaha dhaawici kara diinta Islaamka, qarannimada Ummadda, luuqadda iyo dhaqanka.
10. In la xayeysiiyo dhakhtar aanay xirfaddiisu xaqiijin hay'adaha ku shaqada leh.
11. Sumcad dil ganacsiga iyo meheradaha kale.



STATE GENERAL SOLICITOR

12. Isticmaalka xayeysiimaha, qoraallada iyo suugaanta aan oggolaansho loo haysan.
13. In astaanta Ciidamada loo adeegsado xayeysiin.
14. Xayeysiinta loo isticmaalo muuqaallo iyo qoraallo shisheeye oo aan xiriir la laheyn nuxurka iidhehda, si loogu Khaldo macaamiisha.
15. Adeegsiga xayeysiinta muuqaallo aan waafaqsaneyn Diinta Islaamka, anshaxa iyo dhaqanka suubban.

## Qodobka 37-aad
## Ilaalinta Qiyamka Carruurta

Sida ciyaalku u arkaan ugana fal celiyaan xayeysiinta waxay ku xiran tahay da'dooda, khibradooda iyo habka farriinta loogu soo gudbiyey, xayeysiinta ku wajahan carruurta waa in laga dhowraa waxyaabaha soo socda:-

1. Waxyeellada saameynta ku yeelan kara jirkooda, maskaxdooda iyo anshaxooda.
2. Gudbin farriimo dhaawici kara kaalinta waalidka, macallimiinta, dadka waaweyn iyo bulshada.
3. Gudbin farriimo khatar gelin kara amaanka iyo bad-qabkooda sida ciyaaraha khatarta ah (Game-ka iyo kumbuyuutarada khatarta ah).
4. Gudbin farriimo sababi kara kalsooni darro.
5. Gudbin farriimo khaldi kara kala saaridda dhabta iyo dhalanteedka.
6. Gudbin farriimo khaldi kara awoodda iibka.
7. Ku hagid nooc cunnada ee tayo, tiro iyo qiimaba, ka fogeyn kara tarbiyadda iyo dhaqanka bulshada.

## Qodobka 38-aad
## Filimada iyo Riwaayadaha

1. Baahinta Filimada waa in oggolaansho looga haysto Wasaaradda.
2. In aan la xayeysiin aflaanta argagaxa leh iyo kuwa anshax ahaan khilaafsan Diinta Islaamka iyo dhaqanka suubban.

## Qodobka 39-aad
## Ganaax

1. Cid kasta ee ku xadgudubta Xeerkan waxay muteysaneysaa ganaaxyada ku xusan Xeerkan iyo Shuruucda kale ee Puntland.
2. Ciqaabaha:
   b. Wariyihii ama warbaahintii ku kacda waxyaabaha lagu reebay Qodobka 10-aad farqadda 1-aad xarafka 't' waxaa lagu ciqaabayaa, ciqaabaha ku xusan Qodobka 328-aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
   t. Wariyihii ama warbaahintii ku kacda waxyaabaha lagu reebay Qodobka 10-aad farqadda 1-aad xarafka 'j' waxaa lagu ciqaabayaa Qodobka 205-aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
   j. Wariyihii ama warbaahintii ku kacda waxyaabaha lagu reebay Qodobka 10-aad

farqadda 3-aad Xarafka 'b' waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabaha ku xusan Qodobka 516-aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

x. Dhammaan dambiyada waaweyn ee ka dhalan kara jebinta qodobada Xeerkan waxaa laga tix-raacayaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

kh. Weriyihii ama warbaahintii ku kacda waxyaabaha lagu reebay Qodobka 17-aad waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabaha ku xusan Qodobka 451-aad iyo 452-aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

3. Ganaaxyada:
   b. Cid kasta oo Xeerkani qabanayo ee jabisa Qodobada Xeerkan waxaa lagu ganaaxaya:
      I. Xarig u dhaxeeya toddobaad/asbuuc ilaa 12 bilood ama ganaax lacageed oo u dhaxeeya Shan boqol ilaa kun doolar ( $500 ilaa $1000) ama Sh.So u dhigma.
      II. Ruqsadda iyo aqoonsiga oo laga xayuubiyo muddo cayiman.
   t. Garsooraha ayaa go'aan ka gaaraya culayska ganaaxu yeelanayo.

## Qodobka 40-aad
## Xeer-Nidaamiye

Wasaaradda waxay soo saareysaa xeer-nidaamiye iyo hab-raacyo lagu mareeyo, laguna fuliyo Qodobada Xeerkan.

## Qodobka 41-aad
## Burin

Waxaa la buriyey xeer kasta oo warbaahineed oo aan waafaqsanayn Xeerkan.

## Qodobka 42-aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan-galayaa marka Golaha Wakiilladu Ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



STATE GENERAL SOLICITOR